



WAR-SAXAAFADEED

**Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo Rukhsadihii Ugu Horreeyay
Siiyay Shirkadaha Caymiska Takaful.**

Muqdisho, Soomaaliya – 27 Janaayo 2026

Kadib ansixintii sharciga Caymiska Islaamiga ah ee “Takaful”, bishii **Maajo 2025**, Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa si rasmi ah u billaabay bixinta shatiyadii ugu horreeyay ee la siiyo shirkadaha bixiya adeegga Caymiska Islaamiga ah ee loo yaqaan “Takaful”. Tallaabadan taariikhiga ah waa mid lagu nidaaminayo adeegga caymiska dalka, kaas oo waafaqsan mabaadi’da caymiska shareecada Islaamka iyo hannaanka korjoogteynta adeegga caymiska ee casriga ah.

Guddiga Sare ee Maamulka Bankiga Dhexe ayaa kulankiisii caadiga ahaa ee qabsoomay **24ka Janaayo 2026**, waxa uu ku ansixiyay codsiyada shati-siinta afar (4) shirkadood oo buuxiyey shuruudaha ruqsad-siinta adeegga caymiska. Shikadahaasi oo kala ah:

1. First Somali Takaful Insurance LTD
2. Amanah Insurance LTD
3. Baraka Takaful Insurance LTD
4. Salmastar Insurance

Tallaabadani waxay xoojinaysaa nidaaminta iyo korjoogteynta adeegga Takaful, si loo maareyo khataraha la xiriira adeeggan, iyadoo la dhisayo hannaan caymis oo waafaqsan mabaadi’da Shareecada Islaamka, si kor loogu qaado helitaanka adeegyo caymis oo leh hal-abuur, loona xoojiyo kalsoonida maalgashatada, iyo tan macaamiishaba.

Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Mudane, Cabdiraxmaan Maxamed Cabdullaahi, oo ka hadlaya muhumidda arrinkan ayaa yiri: *“Tallaabadani waxay dhidibada u adkaynaysaa nidaamka maaliyadeed ee dalka. Shati-siintani waxay lagama-maar-maan u tahay korjoogtaynta shirkadaha caymiska iyo maareynta khataraha maaliyadeed ee la xiriira adeeggan.”*

Bangiga Dhexe ee Soomaaliya waxaa ka go’an horumarinta iyo ilaalinta xasilloonida hannaanka maaliyadda.

-Dhammaad-

